wargeyska JAMHUURIYA ONLINE EDITION http://www.jamhuuriya.info/index.php

# Xeerkan Komishanka Qaranka Mid ka Fiican bay Somaliland u Baahan Tahay"Garyaqaan Ibraahim Xaashi Jaamac.

London (Jam) 06/01/2007- Garyaqaan Ibraahim Xaashi Jaamac oo ah garyaqaan u dhashay Somaliland oo deggan dalka Ingiriiska, kana mid ah qareennada ku takhusasay xeerarka caalamiga oo u warramayey weriyaha Jamhuuriya Times Mr. Khadar Xasan Cali, ayaa naqdi cilmiyeysan ku sameeyey xeerka Komishanka Xuquuqal-insaanka Dawladda Somaliland ee hadda ansixintiisu hortaal Golaha Wakiillada oo uu sheegay inuu u baahan yahay in wax-ka-beddel lagu sameeyo meelo badan si loo sii xoojiyo xuquuqda aasaasiga ah ee qofku xaq u leeyahay inuu helo.

Sida aynu la wada socono bishii November, 2007, waxa ay xukuumadda Somaliland u gudbisay Golaha Wakiillada mashruuca Xeerka Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha oo ka kooban 42 qodob, iyada oo ilaa hadda uu shaqeeyo Komishan xukuumaddu magacowday oo aan ku dhisnayn wax xeer ah.

Garyaqaan Ibraahim Xaashi Jama oo ka mid ah aqoonyahannada faro-ku-tiriska ah ee ku takhasusay xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo fasiraadda Distoorka Somaliland, isla markaana ah tifatiraha mareegta www.somalilandlaw.com, ayaa waxa uu deedafeeyey mashruuca xeerkan oo uu ku tilmaamay mid aan ka tarjumayn baahida dalka taal ee dhanka ilaalinta xuquuqda Insaanka. Waxaannu werwer badan ka muujiyay qaabka xulidda iyo magaacdbidda guddida oo inta badan dhanka madaxweynaha ka imanaysa. Waxa kale oo si adag ah u dhaliilay in Golaha Guurtida, mar kale la soo dhexgeliyo arrimaha xulista hawlwadeennada qaranka, maadaama distoorka qaranku buu yidhi, aannu caadiyan awoodaha magaacaabista siinayn.

Waxa uu Garyaqaan Ibraahim sheegay in marka la barbardhigo waddamo kale oo Afrika iyo Aasiyaba ay Somaliland kaga horreyso habka dimuraadiyadda iyo xorriyadaha qofka, taasina waa guul shacbi ahaan iyo dowlad ahaanba u soo hoyatay. Haseyeeshee waxa uu yidhi,

> "Weli waxa jira waxyaabo badan oo loo bahan yahay in la hagaajiyo, illeyn xeerkan cusuba ujeedadiiso waa si adkeynta xuquuqda aasaasiga ah, balse waxa uu garyaqaanku walaac badan ka muujiyay xeerkan xukuumaddu u soo gudbiysay Golaha Wakiillada oo uu ku macneeyay mid aan kafaallo-qaadeyn madaxbannaanida looga baahan yahay Komishan dabagala ku xadgudubka xuquuqda aadimaga oo inta badan ka yimaadda dhanka xukuumadaha iyo laamahooda, taas oo ku tilmaamay mid aan waafaqsanayn nuxurka iyo tafsiirka casriga ah ee mabaadii'da dhismaha Komishannada xuquuqda aadamaha u hadla oo ay ka mid yihiin "Mabaadii'da Paris ee 1991" (The Paris Principles 1991).

Ibraahim Xaashi Jama oo faahfaahin ka bixinayey xeerkan waxa uu yidhi;

> “Nasiib-darro, waxa caadi inoo noqotay in mar kasta oo loo baahan yahay in la dhiso Komishan ama guddi ah in ay ka madaxbannaanaato xukuumadda si ummadda oo dhani ugu kalsoonaadaan dhexdhexaadnimadooda, in ay Xukuumdu ku adkeysato in Madaxwynuhu uu magacaabistooda iyo kala dirkoodaba gacan weyn isagu ku yeeshu. Taas waxa raacsan, iyada oo marka distoorka qaranka la eego Golaha Guurtidu aanay caadiyan shuqul ku lahayn magacabista hawlwadeennada qaranka (marka laga reebo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Guddida Culimada), iyagana ay xukuumaddu soo dhexgeliso arrimaha magacaabista, sidii hore u dhacday sannadkii 2001kii markii Guurtida lagu soo daray magacaabista Guddiga Doorashooyinka. Haddaba, weynu aragnay habkani dhibataada uu inoo keenay sannadkii 2007 markii la soo magacaabayey Gudiggii Doorashooyinka, imikana waxaad mooddaa in tii oo kale xukuumaddu ku wado Komisahanka Xuquuqda Aadamiga ah.”

Garyaqaan Ibraahim isaga oo hadalkiisa sii wata waxa uu yidhi,

“Xeerakan cusubi wuxuu leeyahay Komishanku waxay ka koobaanayaan 7 xubnood oo Madaxweynuhu laba jeer xulashoodada uu isagu keligii awoodda u leeyahay:

1.Marka hore Madaxweynuhu wuxu abuurayaa guddi 7 xubnood ah oo 3 isagu markiiba soo mgacaabay, labana waxa la soo baxaya Golaha Guurtida, labada kale waa garsoorayaayaal Makamadda Sare oo Guddoomiyahoodu soo magacaabayo, inkasta oo maxkamaddani tahay ta go’aannada Komishanku soo saaraan xukuumaddu rafcaanka uga qaadanayso (sida uu dhigayo Qod. 27(4) aad ee Xeerkani). Labadan garsoore waa kuwii Madaxweynuhu isagu magacaabay, markaas guddidan 7da, 5 ayaa ka soo jeeda xagga Madaxweynaha, iyaguna waxu xeerku amrayaa in 12 qof oo ku habboon xubinnimada Komishanka ay soo xulaan oo magacyadooda u gudbinaya Madaxweynaha.

2.Marka labaad, Madaxweynaha ayaa ka soo xulanaya liiskaas 12-ka ah 7 xubnood oo magacyadooda u gudbinaya Golaha Wakiilada.

3.Marka saddexaad, Madaxweynaha ayaa ka soo xulanaya 7-da xubnood ee Wakiilladu ansixiyaan Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku-xigeen (eeg Qod 9(3)).”

“Halkaas waxa ka muuqata in magacaabistu ay Madaxweynaha uun isugu soo biyo shubatay,” ayuu yidhi Ibraahim. “Taasna waxa raacasan,” ayuu yidhi, “xil-ka-qaadista iyo anshax-marinta Guddoomiyaha Komishanka oo uu Madaxweynuhu isna awood u leeyahay (Qod.21aad), sida shaqaalaha dawladda, xubunnimada Komishankana wuu ka xayuubin karaa xubin kasta, haddii Golaha Wakiiladu oggolaadaan.”

Waxa kaloo Garyaqaan Ibraahim dhaliilay awoodaha Komishanka xeerkani siinayo, waxaannu isagoo arrintaa sharraxaaad ka bixinayey ku taliyey oo yidhi; “Haani gunta ayay ka tollontaaye, aynu horta laba arrin yeelo. Marka hore aynu soo saarno xeer kooban oo hirgelinaya xuquuqda aasaasiga ah ee ku qoran distoorkeena, qeexayana waajibaadka dawladda iyo laamaheeda, ciqaabta iyo magdhowga ku xadgudka xuquuqdaas iyo habka loo marayo in maxkamaduhu fuliyaan oo dhowraan xuquuqdan aasaasiga ah. Tan labaad, waa in dawldadu, iyadoo la tashaneysa ururrada rayidka ay soo saarto qorshaha qaranka ee Xuquuqda Aadamiga ah (National Action Plan on Human Rights) oo dhigaya

tallaabooyinka xukuumadda iyo laamaheedu qaadayaan sannadaha soo socda si loo xoojiyo xuquuqda aadmiga. Qorshahan waa mid Qaramada Modoobay ku adkeeyaan dawladaha oo dhan wixii ka dambeeyey. sannadkiii1993kii, qorshahaasna waa in la horkeena Baarlamaanka."

Garyaqaanku isagoo taladan faahfaahin ka bixinayeyna waxa uu hoosta ka xarriiqay arrimahan hoos ku xusan:

1. Qod 8aad ee Distoorka wuxu kafaalla-qaadayaa sinnaanta muwaadiniinta. Haseyeeshee, ma lihin xeer casri ah oo caddeynaya siyaabaha qof sinnaantiisa ay dawladdu duudsiisey uu xaqiisa maxkamadda horteeda uga dacwoon lahaa. Weli waxaynu hadal-heynaa habkii lixdameeyadii oo kiis kasta oo idaari ah (administrative law actions) oo lagaga cabanayo go'aan dawladeed ay Maxkamdda Sare oo kali ahi ku shuqul leedahay, cidna aanay ogeyn habka loo raaco arrimahaas.

2.Qod 21aad ee Distoorku wuxuu cadeynayaa in waaxyaha qaranka oo dhammi waajib ku tahay in ay ilaaliyaan xuquuda aasaasiga, laakiin ma jiro xeer waajibkaas hirgelinaya oo dhigaya habka uu muwaadinku garnaqsi ku doonan karno marka xuquuqdiisa la duudsiiyo.

3. Inkasta o Maxkamadda Distooriga ahi ay leedahay fasiraadda arrimaha distooriga, tan sarena ay leedahay awoodda xallinta arrimaha Idaariga ha (administrative cases), laakiin maxkamad kastaa waxa sida ku qoran Qod 21aad waajib ka saaran yahay hirgelinta xuquuqda aasaasiga markasta oo ay kiis dambi ama maddani ah qaadeyso, marka laga reebo lifaaqa xeerkii 1962kii ee dhismaha garsoorka oo ku saabsan Maxkamaddii Sare ee waqtigaas, weli ma heyno xeer si fiican oo casri ah u caddeynaya habka ay maxkamaduhu u marayaan su'aalaha ku saabsan xuquuqda aasaasiga ah.

4. Xeerkii Nidaamka Garsoorku ee cusubaa weli lama hirgelin, maxkamadahiina weli looma caddeyn siyaabaha ay ku fulin karaan xaata awoodda "haebus corpuskii" (awoodda lagu sii dayn karo qof si sharci-darro ah u xidhan) ee Afwenye laalay, dibna aynu u la soo noqnay 1991kii."

"Baahida loo qabo xeer cusub waxa ku tuseysa," ayuu Garqyaqaanku yidhi, "dhacdadii sannadkan tagay markii ay dacwad isku dayeen in ay ka furtaan Maxkamadda Sare dad u xidhan Guddiyadda Nabadgelyada ee sida kaska ah ugu tunta xorriyadaha muwaadiniinta, maxkamadduna diiday in ay dacwaddaa aqabasho, iaa maantana lama arkin weli maxkamad dadka faraha badan ee xabsiyada Somaliland ugu xidhan amarka Guddiyada Nabadgelyadda tidhi ama hala siidaayo ama hala horkeeno makmad sharci ah (court of law). Markaas, haddii maxkamadahii aanay siideyn karin dadkan u xidhan Guddiyada Nabadgelyada, Komishan Madaxweynuhu soo magacaabay arrimahan waxba kama qaban karaan."

Waxaannu intaa ku ladhay oo yidhi "Innaga oo ogsoon halkii ay xukuumaddu la martay SHURO-NET oo ahayd urur aanu dawli ahayn, Komishan ay soo magacaabatayna xitaa haddii ay dadaal muujiyaan, meel ma gaadhayaan, ilaa aynu beddelo xeerarkeena iyo hab-scodka iyo barnaamijka xukuumadda ee ku saabsan ilaalinta xuquuqda aadamiga ah."

Jamhuuriya Online